

GURI WAX U SOO IIBSASHO

INTERNEET ♦ BOOSTO KU DALBASHO ♦ TELEFOON ♦ FAKSI ♦
IYO DIGITAL TELEVISION

XAQUUQDAADA SHARCI WAX IIBSADE AHAAN

Hadaad iibsatiid alaab ama adeeg ado isticmaalaaya internetka, boost, tefeloon, faksi, ama adeega digital tilifishan loo yaqaan wax ka dalbato, wax iibsade ahaan waxaad yeelanaysaa xaquuq sharci cusub:

1. WAR SIIN CAD

Wax kaa iibshehaagu waa inuu ku siiyaa:

- magaciisa iyo, hadey tahay inaad lacagta u qadintid, ciwaankiisa boosto;
- faahfaahin ku saabsan alaabada ama adeegyada;
- qiimaha alaabta oo ay ku jirto dhammaan wixii canshuur ah iyo qiimaha kuu keenista;
- isla meel dhigida sida lacagta alaabta loo bixinaayo;
- qaabeynta sida alaabta laguugu keenaayo; iyo inuu
- xaq kuu siiyo inaad waxa la dalbaayo ka noqon kartid iyo inaad mas'uul ka tahay qiimaha ku baxaaya hadey noqoto in alaabta la celinaayo.

Waa inuu sidoo kale kuu sheegaa:

- adeegyada, waqtiga ugu yar ee adeeg dayactir qandaraas, haddii alaabta adeeg dayactir la socdo iyo cadadka xiliguu socon doono; iyo
- mudada qiimaha uu wax kugu siinaayo soconaayo.

2. XILI DIB U CELIN WAXAAD IIBSATAY

Ka dib markaad alaabta gadatay hadaad is badasho oo aad go'aansato inaad iska celiso, sharcigu waxuu ku siinayaa inaad muddo todoba casho oo la shaqeeyo ah aad iska celin karto alaabtaad soo iibsatay ama ka noqoto alaabtaad dalbatay.

3. TUUGO KA BADBAADIN KIRIDHID KAARARKAAGA

Haddii qof kale kaarkaaga si tuugo ah wax ugu qaato ama wax ugu gato, waad diidi kartaa inaad bixiso lacagta lagu qaatay ama alaabta lagu gatay kaarkaaga, xafiiska kaarka ku siiyeyna waa inay lacagtii kaarka lagu qaatay dib akownkaaga ugu celiyaan.

Meesha Gacansiin laga helaayo

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqdaada la soo xiriir xafiiska la taliya mawaadinka (Citizens Advice Bureau) ama Trading Standards Department. Waxaad ciwaankooda iyo telefoonka ka heli kartaa buugga telefoonada deegaankaaga. Xafiiska Office of Fair Trading waxaad kala xiriiri kartaa khadkooda qaabilsan wax iibsadayaasha ee 08457 22 44 99.

Hadaad heli karto khadka internetka waxaad talo bixin internetka ugu heli kartaa adigoo ak eega shabakayada internetyadan: www.adviceguide.org.uk, www.tradingstandards.gov.uk, www.oft.gov.uk or the DTI's **Consumer Gateway** website at www.consumer.gov.uk